

## SIDAN FUDUD BAAD U KALA SOOCI KARTAA HADHAAGA CUNTADA

Waxaa aad u baahnatahay bac ama kiish ka sameysan warqad ama xaashi iyo koley xajiye ah. Koleyga ama xajiyaha waxa aad hoo dhigeysaa barkada lagu dhaqo weelka ee ku taala jikada, kiishka ama bacda ka sameysan xaashida/warqada waxaa ku siin doona mulkiilaha guriga ama shirkada guriga iska leh.

1. Kala bixi kiishka ka sameysan xaashida/warqada oo hoos ugu riix ilaa gunta koleyga ama xajiyaha si uu ugu istaago si dheeli tiran.
2. Hadhaaga cuntada ee qoyan ka miir biyaha ka hor inta aanad ku ridin kiishka/bacda ka sameysan xaashida/warqada.
3. Isku soo ururi afka kiishka/bacda ka sameysan xaashida/warqada si afka aad uga xidhi karto.
4. Ku rid kiishka/bacada ka sameysan xaashida/ warqada ee qashinku ka buuxo foostada qashinka ee buniga ah.

Waxyaabahan ayaad ku ridi kartaa kiishka/bacda ka sameysan xaashida/warqada ee loogu talo galay in lagu rido hadhaaga cuntada:

- Qolofka/diirka khudaarta, ukunta iyo khudaatra cagaaran
- Rootiga
- Hilibka iyo kaluunka/maleyga
- Waxyaabaha laga sameeyo caanaha
- Nac-naca
- Shaandhada ama filtarka kafeyga iyo shaaha
- Caleenta ubaxa ee khaayistey ama qaaray
- Warqadaha afka la iskaga tiro iyo warqadaha gacmaha la iskaga tiro

Ha ku ridin wax kale oo aan cuntada hadhaaga ah ka aheyn foostada qashin lagu rido qashinka ee buniga ah. Waxyaabaha ka sameysan caaga iyo qashinka kale ee caadiga ahi waxaa ay kharibayaan dib u isticmaalka (återvinningen).

Fadlan ka akhri macluumaad dheeri ah oo ku saabsan kala soocida iyo sida qashinka loola tacaalo [www.aos.skovde.se](http://www.aos.skovde.se)